# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXWEYNAHA GOLOHA SARE EEE KACAANKA**
**8 Maarso 1975, L. 59.**
**Magac Bedelid.**

ISAGOO ARKAY Xaashidii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaanuunkii Kowaad ee 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO TIXGELIYEY Habka lagu maamulo Xabsiyada dalalka Hantiwadaagga ah iyo ujeeddada laga leeyahay haynta qofka ku gefa nidaamka mujtamaca;

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Asluubtu;

ISAGOO DHEGEYSTAY Ra'yigii Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

In magacii Ciidanka Xabsiyada loo beddeley Ciidanka Asluubta.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geli doonaa marka faafinta rasmiga ah lagu soo qoro.

Muqdisho, 8 Maarso 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*